

SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1058

THE BOOK OF AMOS CHAPTER 6:2-8

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC AND UNDER

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub. Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay kitaabkii Caamoos oo ahaa nin Ilaah farriin ugu soo dhiibay boqortooyadii woqooyi xilli ay ku baraareen hawlahooda, laakiin haddana ay Ilaah ka dheeraadeen.

Caamoos ma ahayn nin la mid ah culimadii waxbaratay ee wakhtigiisa, wuxuuse ahaa nin uu ka dhex shaqaynayno Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah. Mar uu la hadlayey Dadka reer binu Israa'iil ayaa nebigu wuxuu iyaga garansiinayaa waxa ku soo socda oo ah in magaalada la burburin doono. Wuxuuse u sii sheegayaa in dembiyadooda aawadood Ilaah burburin doono magaalada Beytal. Intiise aan burburku ku dhicin

qaranka ayaa waxaa dadkii lagu wargelinayaa inay Ilaah u soo leexdaan si bal wax un uga badbaadaan. Waxyaabaha nebigu kula hadlayo reer binu Israa'iil waa waxyaabo caam ah oo khuseeya qaran waliba. Wuxuuna leeyahay, sida ku qoran kitaabkii Caamoos 5:14-15, waxaana nebiga uu leeyahay, iyadoo Ruuxa Qoduuska ahi ka dul hadlayo,

"Wanaagga doondoona, sharkase ha doondoona, aad noolaataane, oo sidaasuu Rabbiga ah Ilaaha Ciidammadu idiinla jiri doonaa sidaad u tidhaahdeen. Sharka nebcaada, oo wanaaggajecclaada, oo caddaalad iridda ku sameeya, waayo, waxaa suurtoowda in Rabbiga ah Ilaah aciidammadu uu u roonaado kuwa reer Yuusuf ka hadhay."

SONG: REEL-----CUT-----

Markii noogu dambaysay dhegaystayaal waxay inoo joogtay in dadku markii ay wakhti wanaagsan helaan aanay Ilaah xusuusan siday u badan yihiin. Haddaba Samaariya waxay ahayd meel xarun u ah quruumaha, waxaana taas ay soo jiidatay dareenkii reer Ashuur. Waxaanay noqotay in reer Ashuur ugu dambayntii ay burburiyaan magaalada Samaariya.

Balse waxaa magaalada dib u dhisay ninka la yiraahdo Herodos. Wuxuu kaloo dhisay meelihii burburay ee dhulka Falastiin. Wuxuu gebi ahaan dhisay qalcadihii Kaysariya ood hammaantood la burburiyey, laakiin Samaariya dib u habayn buu ku sameeyey, waayo waxay ahayd magaalo aad iyo aad u qurux badan. Qalcadaheeda faraha badan iyo derbiyada ku wareegsan aawadeed ayaa reer binu Israa'iilkii noolaa wakhtigii Caamoos ay dareemeen inay nabad iyo xasilooni iyo daafac adagba leeyihiin. Waxaa nebigu

leeyahay sida ku qoran 6:1, markaasoo nebigu uu lahaa:

"Kuwaasoo ah kuwa caanka ah ee madaxda quruumaha oo dadka Israa'iil u yimaadaan!" Marka la leeyahay, **"Madaxda quruumaha"** ayaa loo jeedaa amiirrada Israa'iil oo iyagu ahaa rag awood lahaa. Markii haddaba dadka caadiga ah ay garsoor ugu yimaadaan, ayaanay innaba amiirradaasu aanay u garsoori jirin dadkooda.

Waxay daba-geli jireen waxyaabaha ay xiiseeyaan iyo inay xumaantooda iyo xaaraanta ay samaynayaan iyo faakihiysigooda ay daba galaan. Waxaa kaloo **"Madaxa Quruumaha"** loo fasiran karaa reer binu Israa'iil qudhooda, oo iyagu ahaa dad magac leh oo laga wada yaqaanno quruumihii waagaas isla sida ay imminkaba yihiin oo loo garanayo.

Haddaan dib ugu soo noqonno turjumadii kitaabak ayaannu dhegaystayaal idiin akhrinaynaa kitaabkii Caamoos 6:2, waxaana qoran sidatan:

"Kalneh u gudba oo bal eega, oo halkaasna ka sii taga Xamaat tan weyn dabadeedna waxaad sii tagtaan Gat ta reer Falastiin. Iyagu miyey ka wanaagsan yihiin boqortooy-ooyinkaas? Dalkoodu miyuu ka weyn yahay dalkiinna?"

Waxaa nebigu leeyahay: **"Kalneh fiiriya....?"** Kanah waxaa weeye mid ka mid ah magaalooyinka ku yaalla halka wegiba Tigris ku kala qaybsamo iyo halka uu ku kala qaybsamo webiga Xaab. Nineweh ayaa iyaduna deegaannadaas ku taallah, oo Kalneh bay ku dhowayd. Waxaana gobolladaadu ahaayeen xarumaha dhaqammada waddammadii ilbaxda ahaa ee berigaas. Nebiga oo hadalkiisa sii wata ayaa wuxuu leeyahay:

"Oo halkaas ka sii taga Xamaat, tan weyn." Xamaat waxay ahayd magaalo ka mid ah magaalooyinka ugu waaweyn ee reer Suuriya. Imminka dhanka koofureed ayaannu eegaynaa, oo wuxuu nebigu leeyahay: **"Dabadeedna waxaad sii tagtan Gat ta reer Falastiin."**

Gat waxay ku taallaa koofurta dhulka Falastiin, oo waxaya hayd magaalo madaxda qoomiyaddii reer Falastiin. Wuxuu markaa nebigu dadka weyddiinayaa su'aal oo wuxuu leeyahay, **"Iyagu miyey ka wanaagsan yihiin boqortooyooyinkaas? Dalkoodu miyuu ka weyn yahay dalkiinna?"** Waxaa Ilaah imminka uu la barbardhigayaa reer binu Israa'iil quruumaha ku wareegsan.

Wuxuu iyaga ku leeyahay, **"Bal eega maxaad kaga duwan tihiin qaramada kale. Maxayse kuula muuqataa inaad ka sarraysa qaramada kale?"** Wuxuu markaa ku leeyahay, "...kama sarraysaan quruumaha kale, oo waxaad la mid tihiin qaramada karaahiyada ah ee aan ku socon sharciga Rabbiga, inkastoo weliba idinka laydiin muujiyey sharciga, oo laydin siiyey. Mas'uuliyaddiinnuna way ka sarraysaa mas'uulidadda dadka imminka waayo iyaga waxaa ku dhex jira nebiyo Ilaah oo loo muujiyo akhbaarka Ilaah ka yimaada. Imminka Caamoos wuxuu shaaca ka qaadayaa dembiyadii Israa'iil, waana saddexda dembi ee Qarankaas dumisay. Waxaa kaloo saddexdaas dembi uu burburiyey qarankii reer binu Israa'iil ee reer Yauudah. iyo weliba Baabuloon iyo Masar, iyo Giriigra io reer Rooma. Dembiyadaas saddexda ah waxay dhulka keeneen qarammo aad iyo aad u fara badan. Waxay kaloo dhulka keeni doonaan qaramo aan

farayaryn. Waa isla dembiyada qarama badan oo dunida ku nool ama iman doona oo xoog leh, dhulka keeni doona, waana dembi Ilaah u ciqaabo qarammada. Bal aynu horey idiinku sii wado meeriska cutubka 6aad, waxaanan idiin akhriyayaa aayadda 3aad, oo waxaa gorniinka Qoduuska ahi leeyahay sidatan:

"Waxaa iska hoogay kuwiinna maalintii sharka fogeeya, oo ka dhiga fadhigii dulmiga inuu soo dhowaado."

Waxaa reer binu Israa'iil ay lahayd, **"Haa, maalintii xisaabta way imanaysaa, laakiin ma soo dhowa."**

Innagu uma baahnin inaynu ka xumaanno arrinkaas isaga ah. taasina waa wixii Xisqiyaah qudhiisa uu ku lahaa Ishacyaah, markii Ishacyaah u sheegay in ciqaabi ay dul saarnaan doonto boqortooyada koonfureed, oo ciqaabtaasina oo waxay ahayd in wakhti mustaqbalka ah iyaga ood han loo kaxaysan doono musaafuris.

Ha yeshee Xisqiyaah aad buu u farxay, oo wuxuu yiri, **"Marba haddaanay wakhtiga ahayn wakhtiga anigu aan noolahay wakhtiga ciqaabtu ay soo degayso, de waa qushigeed."** Nin waliba wuxuu ka fakarayaa qoyskiisa iyo carruurtiisa, wuxuuna doonayaa waxa uu aaminsan yahay inuu la aaminsanaado, oo waxa uu neceb yahayna uu la nebcaado, waxa uu jecel yahayna uu la jecclaado. Xoriyad weyn oo sidaas ah heli maayo.

Waa inuu nebcaado wax kasta oo waalidkiis iyo qoyskiisu ay neceb yihiin si bulshada looga dhex aqoosado. Qarankii dhallinyaro caynkaas oo kale ah ay u hana-qaadaan waxaa hubaal ah inuu burbur ku dambayn doono. Taasina waa qayb ka mid ah saddexdii dembi ee keentay in qaranka reer binu Israa'iil uu

burburo, oo qaramo badan oo dunida hina ay burburaan, waayo ma lahan dan guud oo qaranku leeyahay, waxaa qaranka ku badanaya danaha gaarka ah ee shakhsiyaadka kala duwan oo aan isku wada afkaara ahayn. Balse kan kowaad ee u horreeya dhegaystayaal dembiyadii saddexda ahaa ee burburiya qarammada ayaa wuxuu ka bilaabanayaa aayadda 4aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Oo sariiro foolmaroodi ah ku jiifsada, oo gogosha isku kala bixiya, oo cuna baraarka idaha iyo weylaha edegga ku dhex jira."

Waxaa dembiga ugu horreeya inay ahaayeen kuwa jecel inay nolol isteareex badan ku jiraan, oo haddana ay u dheereeyaan macaasida, oo iyadu ah dunuubta dembiga xagga jidhka. Waxaa Qorniinku leeyahay, **"Kuwa ku jiirsada sariiro fool-maroodi laga sameeyey, oo gogosha isku kala bixiya..."** Waxay ku tusaysaa inay aad iyo aad u jecel yihiin istareexa. Reer Samaariyana waxay ku noolaayeen nolol raaxo leh, waxaana baaritaan dhulkaa ka socda lagu soo saaray weelashii ay isticmaali jireen, waxaanay taas bayaaminaysaa nolosha wacnayd ee ay ku noolaayeen dabaqadda sare. Waxay ku jiifsadeen buu nebigu leeyahay, **"Sariiro fool-maroodi laga sameeyey."** Miyaanay markaa kuu muuqan inay wax waliba sahashanayeen.

Wuxuu kaloo nebigu leeyahay, **"...oo gogosha isku kala bixiya."** Waxaa taas ay ka macne tahay inay aad u jecelaayeen sinada, oo caan ka ahayd dhulka ay ka taliso boqortooyada woqooyi, waana wax imminkadanba caan ku ah dalkayaga. Waxaa nin waliba uu garanayaa sinada daba socota qayilaadda iyo sida laysugu kala

bixiyo dermaha iyo joodariyaasha fidsan goobaha lagu marqaamo. Mana ahan sinadu sheey dhallinyarada maanta loo sheegi karo, iyaga ayaa inaga badiya. Markaa macaasidu maahan oo keliya inay baabi'inayso dadka, laakiin waxay kaloo baabi'isaa qaramada. Qaran waliba ee isku dhiibo sino iyo marqaan, waxaa ka lumiya hoggaankii suubanaa, oo qalbigooduna ma degganaanayo.

Waxay keliyahoo doonayaan inay macaasida sii wataan. Ninkii hal naag leh kuma filna oo wuxuu raadinayaa mid kale. Naagtiina waa la mid oo mid kale ayey raadinaysaa. Haddii ay kula tahay inaan ka badbadinayo, ilaa iyo imisa gabdhood baad garanaysaa, oo doonaya inay nimankooda iska furaan, iyo kuwii horey isaga furay. Imisa rag ah ayaad garanaysaa oo naago kale guursaday iyadoo weliba qaba kuwoodii hore?

Waxyaabahaas aad arkayso waa sino, waayo la dooni maayo ninku inuu guursado in ka badan hal naag, naagtuna la dooni maayo inay guursato wax ka badan hal nin. Qarankii caadysta inuu ku dhaqmo go'aankaas Rabbaaniga ah, waa hubaal inuu baraarayo, waayo sidaasaa Ilaah ku farxaa. Dooni maayo in naagi ay ninkeeda ka tagto.

Ninna uunaagtiisa ka tago, oo uu naaga kale ka doono raaxo ka badan tii uu ku haystay xaaskiisa. Waxaa kitaabka Qoduuska ahi leeyahay, sidaannu horey idiinku soo sheegnay kitaabkii Hoosheeca 4:11, **"Sinada, iyo Khamriga iyo khamriga cusububa qalbigay la tagaan."**

Haddaan dib ugu noqonno meeriska ayaannu haatan eegaynaa dembiga labaad ee qaran burburiya, waxaana

qoran sidatan:

"Oo u heesa dhawaaga shareeradda, oo isu hindisa alaab muusiko sidii kuwii Daa'uud."

Waa kuwa ahlu-balwadda ah oo curiya heesaha marka ay marqaamayaan, oo welibana waxaa la mid ah kuwa marka ay marqaamayaan haddana dhegaysta sawaxanka miyuusikada dananaysa ee u roon dhegahooda. Kuwaasu haddii ay madax yihiin, miyaan dalkaasu beylah noqonaynin, waayo madaxdiisii heeso jacayl ah ayey curinayaan.

Waxaa laga doonayey inay wax hoggaamiyaan, oo dadka soo booqdaan, oo ogaadaan dhibka ay qabaan. Ninka ditoorka ah waxaa la doonayaa in gabadha sariirta jiiifta ee xumadda la tabaalaysan uu dawooyin u raadiyo, kan macallinka ahna inuu ilamaha fasalka u dhooban wax baro.

Kan xaakinka ahna inuu agoonta iyo carmallada guryahoodii laga haysto u soo daayo. Kan barfasoorka ahna inuu Jaamacadda tago oo uu baaritaanka uu wado guulo ka soo hooyo. Ninkii xil-dhibaanana uu ka fakaro sidii waddanka uu ku horu-mari lahaa oo nolosha dadka loo hor-marin lahaa, oo sumcaddii qarannimana loo ilaalin lahaa.

Waxaan garanaynaa inaan ninna waxyaabahaa ka fakarin maanta, haddaba haddaan arrinka saddexaad isla eeno ee ah dembiyada keena in qaran uu soo dhoco ayaa waxaannu ka akhriyeynaa kitaabkii Caamoos 6:6, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Oo khamriga maddiibadaha ku cabba, oo ku subkada saliidda ugu wada fiican, laakiinse kama murugaysan dhibaataada reer Yuusuf haysata."

Bal aad u eeg waxa nebigu leeyahay. Wuxuu tafaasiil

ka bixinayaa madaxda iyagu wax waliba haysta, laakiin kuwa ay xukumayaan aan shaqada ku lahayn waxa cawaqibkoodu noqonayo. Wuxuu leeyahay, nimankaasu khamriga waxay ku cabbaan baaquliyo waaweyn, waayo kuma filna wax qarsho lagu soo shubay ama koobab.

Waxaa la mid ah kuwo xermooyinka qaadka ah ka laaca, oo welibana wata gawaarida ugu qaalisan, ee ku hoyda guryaha waaweyn, laakiin aan eegaynin maslaxada dadka deegaankooda oo ay isku reerka yihiin. Wuxuu weliba xiranayaa dharka ugu wanaagsan, oo wuxuu ku subkanayaa saliidda ugu qaalisan, wuxuuna isku soo buufinayaa barafuunka ugu udgoon, laakiin dhibkiisu waxaa weeye in isaga lagu hoos bakhtiyey.

Waa nin keligii cune ah, oo keligii nool, oo wixii uu magaalada keeno, waa haddii uu beec-mushtar yahay e wuxuu ku iibinayaa beec dadka caadiga ahi ayan awood u lahayn. Haddii uu ururrada u shaqeeyana wuxuu cunayaa wixii loogu soo dhiibay dadka. Hadii uu madaxda ilaalisa deegaanka yahayna wuxuu iibsanayaa qoryaha iyo xabbadaha.

Mar waliba waa dallaal kaasoo aan innaba naxariis iyo xushmadba lahayn, oo wuxuu ka fakaraa dantiisa. Shaqo kuma lahan haddii reerka deriskiisa ah ay maanta cunno haystaan iyo in kale. Waxaad mooddaa inaynu nool nahay wakhti la mid ah wakhtigii nebi Caamoos, markaasoo reer binu Israa'iil ay ku badnaayeen keli-cunayaasha.

Ilaahna taas waa ka soo hor-jeedaa oo imminka nebiga ayaa dembiyadoodii faraha ka saaray, wuxuuna leeyahay sida ku qoran aayadda 6aad, **"Oo khamriga maddiibadaha u cabba, oo ku subkada saliidda ugu**

wada fiican, laakiinse kama murugaysna dhibaataada reer Yuusuf haysata." Miyaanay kuwaas oo kale dhulkayaga ku badnayn?

Markaa haddaan saddexdii dembi ee laynnoo soo sheegay idiin dul maro ayaa waxaa ugu horreeya Sinada, waxaana ku xiga faakihiysiga sida in wakhti lagu lumiyo heesaha jacaylka ah, iyadoo ama la qaadayo ama la dhegaysanayo oo la leeyahay, **"Aan is-iri ma deysaa mise waa Doogsiisaayee...Dadow dadow, dadow maxaad ku taliday."**

Kan saddexaadina waa marqaanka ha ku yimaado laama la ruugo ama qamri la cabbo e. Mar waliba ninkii madaxda ahaa wuxuu cunayaa madax dhan, ama kareedyo qamri ah. Xilligii dawladdii hore ee Soomaalida waxaan sheeko ku maqlay in madaxda ka shaqaysa iliilaha dhaqaalaha ay ahaayeen kuwo mar waliba cabsan oo tagaasi lagu qaadi jiray.

Markii ay cabbaan, ilayn fuusto dhan ayey cabbayaane, ayey gabayaan socodka. Markaa waxay la oo heshiin jireen tagsiileyaasha qaar, oo ku oran jireen habeen waliba Curuba iigu kaalay, aad guriga i geyside. Waxay ka soo tegi jireen gawaaridooda, waayo waxay garanayaan haddii ay sakhraamaan, inay ka lumayaan aqalladooda. Ugu dambayntii dembigoodu muxuu keenay?

Wuxuu keenay in qarannimadii lagu waayo, oo ay dhashaan dagaallo sokeeye, oo qarankii uu quudin waayo shacbi-weynihiisa. Waayo raggii masuulka ahaa ayaa maddiibado khamri ah, iyo xermooyin jaad ah ka laacayey, weliban way socotaa, oo ilaa iyo maanta shacbigu way dandarraysan yihiin. Rabbiguna wuxuu ku leeyahay madaxdii reer Efraayim oo ahaa kuwii

ka soo farcamay nebi Yuusuf, **"...laakiinse kama murugaysna dhibaataada reer Yuusuf haysata."**

Hadalku wuxuu ku xiran yahay dhegaystayaal in haddii mas'uuliyaddeenna hoggaamiyanimo aynu ku ciyaarno inaynaan helaynin hoggaamiye kale oo dadkayaga ka fakaraya. Waa in hoggaamiyuhu uu ka yimaado dadka dhexdiisa, waana in la hubiyo in hoggaamiyuhu uusan ahayn nin sinada ama gogol dhaafka caadaysta. Weliba waa in uusan noqon nin heesaha jacaylka ah curintooda ama maqliddooda jecel, oo faraha ka hadla.

Waana inuusan noqon nin jecel inuu ka laaco xermooyin jaad ah ama fuustooyin khamri ah. Dadka caba ayaa waxay ii sheegeen in qofku uu cabbi karo ilaa iyo 25 dhalo oo khamri ah; fuusto iska dheh inta khamriyacabka kaafinaysa. Saddexdaas sheey haddii qaranka ay ku badan yihiin, horu-mar waa ka aaraan, waayo hoggaamiyayaashii ayaan shaqadoodii samaysanaynin.

Welibana kuwa haddii dadka caadiga ah ay sakhraddu ku badan tahay waxaa imanaya dib-u-dhacyo dhaqaale. Saddexdaas sheey ayaa waxay muujinayaan waxyaabo cajiib ah marka aad u fiirsato sida aan loo qancin karin qalbiga dadka. Haddii xitaa la siiyo hantida dunida oo han taalla, qalbiga aadmigu weli wax kale ayuu doonayaa. Ilaah oo keliya ayaa qancin kara qalbiga banii'aadmiga. Waxaana xumaatooyinkii ay gelayeen reer binu Israa'iil ay horseeday baaba'a iyo burburka qaranka.

Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska kitaabkii Caamoos 6:7, waxaa gorniinku leeyahay sidatan:

"Haddaba sidaas daraaddeed iyagu waxay haatan raaci

doonaan kuwa marka hore maxaabiisahaanta loo kaxaysan doono, oo diyaafadda kuwa iskala bixin jiray waa dhammaan doontaa."

Haddaba saddexdii waxyaabood ee dunuubta ahaa awgeed ayaa qaranku u soo dhacayaa, oo raggii amiirrada ahaana xukunkoodii wuu soo dhammaanayaa. Waayo waxay ku sii socdaan in maxaabii-ahaan loo kaxaysto, iyo in qarankoodu burburo. Waxaa sii liciifaya qalbi-wanaaggii qaranka iyo weliba damiirkii iyo niyaddii dadka ay u hayeen waddankooda.

Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 6aad ayaannu haatanna idiin ahriyeynaa cutubka 6aad, aayaddiisa 8aad, baalka 1047 ee Axdigii Hore, waxaana qorniinka goduuska ahi leeyahay sidatan:

"Rabbiga ah Ilaaha ciidammadu wuxuu leeyahay, Sayidka Rabbiga ahu wuu ku dhaartay nafsaddiisa, oo yidhi, Anigu waan karhay isla weynaanta reer Yacquub, oo waan nebcahay daarihiisa waaweyn, sidaas daraaddeed magaalada iyo waxa ku dhex jira oo dhanba cadow baan u gacan gelin doonaa."

SONG: REEL---CUT----

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin

Somttb 1058. Soft-Scripted on 06-17-2019 by SOMTTB. Schedule for airing on 15-01-2020

siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin